## Casharka 3

1. Maxay ahaayeenHadalladii kowaa ee Ilaah ku qoray kitaabkiisa?
-Hadalladii kowaad ee Ilaah ku qoray Kitaabkiisa waa kuwa ku qoran "kitaabka kowaad ee Muuse oo loo yaqaanno Bilowgii."

2. Maxaa Hadallada kowaad Ilaah loogu qoray "Kitaabka Bilowgii?
-Waayo Ilaah wuxuu doonayey inaynu ogaanno in wax waliba ay bilow lahaayeen.

3. Ka hor bilowgii dunida, miyey jireen webiyo iyo harooyin?
-Maya.

4. Ka hor bilowgii dunida, miyey jireen buuro iyo geedo?
-Maya.

5. Ka hor bilowgii dunida, miyey jireen, qorraxda, dayaxa, iyo xiddigaha?
-Maya.

6. Ka hor bilowgii, miyey jireen xayawaan iyo shimbiro?
-Maya.

7. Ka hor bilowgii dunida, miyey jireen dhul iyo cir?
-Maya.

8. Ka hor bilowgii dunida, miyey jireen caddaan iyo madow?
-Maya.

9. Ka hor bilowgii, miyey ruuxyo jireen?



-Maya.

10. Waa kuma kii jirey intan dunida la aasaasin ama la abuurin ka hor?
-Ilaah.

11. Maaddaama Ilaah keliya uu noolaa ka hor bilowgii, waa kuma kan wax waliba ka weyn?
-Ilaah.

12. Maaddaama Ilaah kelidii uu noolaa intaan dunida la uumin, waa kuma kan bilowgii wax inooga sheegi kara?
-Ilaah.

13. Goorma ayuu Ilaah yimid? Ama ahaaday?
-Ilaah bilow ma leh.
-Ilaah weligiiba wuu noolaa
-Oo Ilaah waa daa'im.

14. Miyaa Ilaah la dhalay?
-Maya.
-Ilaah waa baaqi.

15. Miyaa Ilaah Ilaah kale dhalaa?
-Maya.

16. Miyaa qofi sameeyey Ilaah?
-Maya.
-Markaan soo koobo Ilaah waa daa'im.

17. Miyaa Ilaah Ilaah kale sameeyaa?
-Maya.

-Markaan soo koobi saaxiib Ilaah waa daa'im.

18. Ma waxaa jira wakhti aanu Ilaah jirin?
-Maya.
-Ilaah mar waliba wuu nool yahay.
-Ilaah mar waliba wuu nool yahay.

19. Dadku waxay u baahan yihiin cunno iyo biyo ay ku noolaadaan. Ilaah muxuu u baahan yahay si uu ku noolaado ama ku sii jiro?
-Ilaah uma baahna wax uu cuno si uu ku noolaado.

20. Haddaba sidee buu Ilaah ku nool yahay?
-Wuxuu ku nool yahay awooddiisa.

-Maxay kuugula muuqataa in aanu Ilaah u baahnayn cunno uu cuno iyo biyo uu cabbo?

-Waayo Ilaah ma lahan jidh la mid ah kan dadka.

-Maxaad ugu malaynaysay in Ilaah aanu u baahnayn ilayska qorraxda si uu wax u arko?

-Ilaah ma lahan jidh la mid ah sida kan dadka.

-Maxaad ugu malaynaysaa in Ilaah aanu u baahnayn dhul uu ku socdo?

-Waxa ugu wacan in Ilaah aanu lahayn jidh banii-aadan.

-Miyaa Ilaah leeyahay jidh?
-Maya.



-Miyaa Ilaah lafo leeyahay?
-Maya.

-Miyaa Ilaah dhiig leeyahay?
-Maya.

-Ilaah jidh ma leh, oo lafo ma leh, oo dhiig ma leh.

-Haddii Ilaah aanu jidh, iyo lafo iyo dhiig lahayn, muxuu Ilaah ka samaysan yahay?

-Ilaah waa ruux.

-Maxaa loola jeedaa marka la leeyahay Ilaah waa ruux?

-Bal aan tafaasiil idin siiyo:

-Miyaad dabaysha arki kartaa?
-Maya.

-Miyaa dabayshu jirta ama aynu dareennaa marka ay dhacayso?
-Haa.

-Isla sida aadan dabaysha u arki karin, ayaadan Ilaahna u arki karin.

-Isla sida ay dabayshu u jirto, ayaa Ilaahna u jiraa.

-Inkastoo aadan Ilaah arki karin, haddana Ilaah wuu jiraaa.

-Aaway Ilaah, ama halkee buu joogaa?

-Meesha uu joogo isaga un baa garanaya.

-Ilaah wuxuu leeyahay, sida kitaabkiisa ku qoran, meel waliba ayuu joogaa.

-Ilaah wuxuu leeyahay, wuxuu joogaa meel waliba wakhti waliba.

-Ilaah wuxuu joogaa Samada.

-Oo weliba Ilaah wuxuu joogaa dhulka.

-Ilaah wuxuu joogaa imminkadan Amerika.
-Ilaah wuxuu kaloo joogaa Aaasiya isla wakhtigan.

-Wuxuu kaloo joogaa Yurub isla wakhtigan.

-Ilaah wuxuu imminka joogaa halkan.

-Oo Ilaah wuxuu joogaa meel waliba wakhti waliba.

-Miyaa qofi joogi karaa America iyo Africa isku wakhti?
-Maya.

-Maxaa dhacay ee qofi isku wakhti u joogi waayey America iyo Africa?

-Waxaa taas ugu wacan in dadku ay leeyihiin jidh.

-Dadku hal meel bay joogi karaan hal wakhti.

-Ilaah meel waliba ayuu joogaa wakhti kasta waayo isagu ma leh jidh aadmi ah.



-Ilaah meel walba ayuu joogi karaa wakhti waliba waayo Ilaah waa Ruux.

-Ilaah meel waliba ayuu mar waliba joogaa.

-Haddii aad tagto gurigaaga, yaa ula jooga?
-Ilaah.

-Haddii aad saaxiibkaa soo booqnayso, yaa kula jooga?
-Ilaah.

-Ilaah meel wlaiba ayuu wakhti waliba joogaa.

-Halkee baan Ilaah isaga qarin karnaa?
-Ilaah iskama qarin karno.

-Maaddaama Ilaah wakhti waliba uu joogo meel waliba, Miyaannu iska qarin karnaa?

-Maya.

-Haddii aynu isku taxluujinno inaynu buur dusheed Ilaah isaga qarinno, miyaannu ka dhuuman karnaa?

-Maya.

-Ilaah meel waliba ayuu joogaa.

-Haddii aynu isku taxluujinno inaan aqalkayaga isku qarinno, miyaan Ilaah ka dhuuman karnaa?

-Maya.

-Ilaah meel waliba ayuu joogaa.

-Haddii aynu isku dayno inaan duurka ku dhuumanno, miyaannu Ilaah iska qarin karaa?

-Maya.
-Ilaah meel waliba ayuu joogaa.

-Si kalstoo aynu isugu taxluujinno, marnaba Ilaah kama dhuuman karno.

-Maxaa taas sabab u ah?
-Waayo Ilaah meel waliba ayuu joogaa wakhti waliba.

-Kitaabka Ilaah oran maayo Ilaah meel waliba ayuu joogaa isagoo hadba meel orod ku imanaya oo haddana tegaya meel kale.

-Maya.

-Kitaabka Ilaah oran maayo Ilaah jidh weyn buu leeyahay, kaasoo dunida buuxinaya.

-Maya.

-Kitabka ilaah inooma sheego in Ilaah dunida oo dhan ku dul fadhiyo.

-Maya.

-Kitaabka Ilaah wuxuu leeyahay Ilaah waa ruux, oo wuxuu joogaa meel kasta wakhti kasta.



-Ma jiro cid lagu masaali karo Ilaah.

-Ilaah waa kan keliya ee meel waliba jooga wakhti waliba.

-Meel waliba ee aynu tagno, Ilaah baa halkaas jooga.
-Ilaah wuu ina arkaa wakhti waliba.

-Ilaah wuxuu kitaabkiisa inoogu sheegayaa inuu isagu yahay Hal Ilaah.

-Ilaah waa Hal, haddana wuxuu qayb ka yahay saddexnimada Rabbaaniga ah.

-Waa maxay saddexnimadan Rabbbaaniga ah oo haddana ka kooban halka mid.

-Waxay kala yihiin, Ilaaha Aabbaha ah, Wiilka Ilaah, iyo Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah.

-Ilaah waa Ilaaha Aabbaha ah.
-Ilaah waa Ilaaha Wiilka ah.
-Ilaah waa Ilaaha Ruuxa Qoduuska ah.

-Ilaaha Aabbaha ah, Ilaaha Wiilka, iyo Ilaaha Ruua Qoduuska ah iyaga oo dhan waa Ilaah.

-Haddaba marka aad wax badan Ilaah ka ogaataan, waxaad garan doontaan in Ilaah Mid yahay, haddana saddex ka kooban.